



Whatsapp Group



**NIDAAMKA WARBAAHINTA
URURKA IYO QORSHAHAD
BARNAAMIJYADA
WHATSAPP GROUP-KEENA**

**NIDAAMKA
WARBAAHINTA
URURKA
LAASDHUURE**

TUSMADA

1. GOGOLDHIG

2. INTERNET & TECHNOLOGY

- FA'A'IIDOOYINKA AY LEEYIHIIN
- DHIBAAATOYINKA AY LEEYIHIIN

3. WARBAAHINTA

- NOOCYADA WARBAAHINTA
- WHATSAPP & FA'A'IIDOOYINKIISA

4. WHATSAPP GROUPKA URURKA

- HAB-MAAMULKA GROUP-KA
- BARNAAMIJYADDA DIYAARKA AH
- BARNAAMIJYADDA SOO SOCDA

5. WEBSITE-KA URURKA

- FAAHFAAHINTA WEBSITE-KA
- QAYBAHA WEBSITE-KA

6. GABOGABO

M TYPES OF A COMMUNICATION S YOU SHOULD KNOW S



Print media

Form of printed publications such as newspapers and magazines



Digital media

Digital media is a part of articles, podcasts, audiobooks, videos, and digital art.



Radio

Radio is sound communication by radio waves



Social media

Social media refers to online platforms that enable human connections



Internet

Internet media includes electronic publishing, transmission, and webcasting

1. GOGOL-DHIG

"WAR LA HELYAA BA TALO LA HEL"

Warbaahintu si guud waa mid lagama-maarmaan u ah bulshada.

Maanta warbaahinta casriga ahi, waa mid ina siisay fursad aynu danaheena kaga wada shaqayno, innaga oo daafaha dunida kala joogna.

Hadaba Ururka Laasdhure, warbaahin matasha'oo ka shaqaysa danaha ururku, waa mid muhiimad gaar ah u leh.

Ka-urur ahaan; si aynu u helno warbaahin haboon, iyo nidaamkii lagu maamuli lahaa, oo la jaanqaadaya wakhtiga casriga ah iyo danaha ururku, waa ujeedada barnaamijkani daaran yahay.



2. INTERNET-KA & TECHNOLOGY-YADDA

- Internet-ka waxa la bilaabay sanadkii 1960, wuxuu ku bilaabmay mashruuc ay maalgalinaysey hay'ada Qaramada Midoobey (UN) waaxdeeda Difaaca, mashruuca waxa ciwaan looga dhigay Advanced Research Projects Agency Network.
- Ujeedada ugu wayn ee laga lahaa mashruucenna waxay ahayd, in la sameeyo isku-xidhnaan, iyo in kor loo qaado is-weydaarsiga macluumaadka si looga hortago weerarada Nuclear ka, oo xilligaa khatar wayn adduunka ku hayay.
- Muddo sanaddo ah kadib, mashruucii wuxuu noqdey mid la sii balaadhiyey oo kolba la sii casriyaynayay, waxaa na ka dhashay Internet-ka casriga ah ee maanta dunidu ay isticmaasho.
- Sanadku marku ahaa 1990-kii, waxaa la soo saarey qaybta loo yaqaanno World Wide Web (www), taasi oo keentay inu adduunku si fudud isugu xidhmo, macluumadkana si fudud la isu-weydaarsado.


ARPANET
THE FIRST INTERNET



2.1 Faa'iidooyinka Internet-ka & Technology-yadda

Faa'iidooyinka ay leeyihiiin way badan yihiiin, aynu ka xusno inta ugu muhiimsan'ee dunidu ay maanta ku horumartay, waxaana ka mid ah:


- Helidda macluumaadka iyo is-dhaafsiga xogaha (Access to Information)
- Is-gaadhsiintii dunida oo horumar balaadhan ka dhaxashay.
- Waxbarashadii oo helitaankeedii fududaaday, isla markaana ay dunidii wadaagtay aqoonta iyo xirfadihii kala du-duwanaa.
- Ganacsigii oo koboc iyo horumar balaadhan ka helay, gaar ahaan qaybta casriga ah ee loo yaqaan E-Commerce.
- Madadaalooyinka, ciyaaraha iyo hibooyinkii dabiiciga ahaa, oo dadka dunida ku nooli ay ku wadaageen.



2.2 Dhibaatooyinka Internet-ka & Technology-yadda

Dhibaatooyinka ay leeyihii waxaa ka mid ah:



- Dhowrsoonaanta maclumaadka iyo sirta gaarka ah, oo dad badani shaki wayn ka qabaan illaashinkeeda.
- Denbiyada *Cybercrime* ay ka midka yihiin xatooyada iyo dhacca hantida umadda, oo aad u fududaaday.
- Dhibaato caafimaad oo ka dhalatay la-qabsiga balwadaysan (Addiction) ee isticmaalka Internet-ka, arrintani oo qofka halis caafimaad ku ah.
- Xogaha iyo wararka been-abuurka ah (Misinformation) oo si fudud ugu dhex faafi kara, kuwaas oo ay ka dhalan karto dhibaatooyin badan iyo amni daro.



3. WARBAAHINTA

- Warbaahinta waxa la sheegaa inay soo bilaabantay muddo aad u fog ilaa 3200 BC, xilligaasi waxay dadku warbaahin ahaan u isticmaali jireen (Oral Traditions), wararka iyo dhacdooyinka waxa la isugu gudbin jiray sheekooyinka iyo odhaahyo uu jiilba jiil ka dhaxli jiray.
- Warbaahintu waxay si weyn u horumartay, intii ay dunida ku soo kordheen adeegsiga Internet-ka iyo Technology-yadda casriga ah.
- Warbaahinta ay maanta dadku isticmalaan way noocyoo badan tahay, isla markaana way kala muuq iyo maqal duwan tahay, ujeedada guud ee warbaahinta laga leeyahay na waa sidii la isugu gudbin lahaa macluumaadka, wararka iyo dhacdooyinka dunida daafafeeda ka kala dhacaya.

The Evolution of Communications



3.1 Noocyada Warbaahinta

Print Media: noocan waxa soo hoos galaya Jaraa'iddada iyo kuwa la daabaco, waxaa na markii ugu horeysay soo saarey, nin la odhan jiray Johannes Gutenberg's sanadkii 1605.



Broadcast Media: noocan dunida aad ayaa looga isticmaalaa, waxaa na ka mid ah television-ka iyo radio-ga, oo la soo saarey dhamaadka qarnigii 19^{aad} ilaa bilawga qarnigii 20^{aad}.



Digital Media: noocani waa midda casriga ah maanta, ee la adeegsado Internet-ka, waxaana ka mid ah baraha bulshadu ay ku kulanto, sida Facebook, Twitter, Instagram iyo baraha muuqaallada tooska ah lagu wadaago, sida; Netflix, Hulu, iyo YouTube.

Warbaahinta maanta dunida isugu xidhay sida weyni waa noocan, degdeg iyo ilbidhiqsiyo ayaa warka iyo xogaha la isugu gudbiyaa.



3.2 WhatsApp-ka iyo Faa'iidooyinkiisa

WhatsApp-ku waa barnaamij ay maanta dadka dunidu ku nooli aad u isticmaalaan, kaasi oo wax weyn ka taray isku xidhnaantii iyo iska war-haynta bulshada, isla markaana aad u fudaydiyay is-dhaafsigii macluumaadka iyo xogaha.

Application-ka WhatsApp waxa la soo saarey sanadkii 2009, waxa ikhtiraacay labada nin ee magacyadooda la kala yidhaa Jan Koum and Brian Acton, oo ka mid ahaa shaqaalaha mareegta ay bulshadu ku wada xidhiidho ee la yidhaahdo Yahoo.

Ugu danbeyntii tijaabooyin badan oo uu WhatsApp soo maray kadib, waxa si wayn loo casriyeeyay sanadkii 2011, isaga oo noqday Application-ka loogu xiiso badan yahay, ee lagala dego AppStore-ka.

Sanadihii 2015 iyo 2018 waxa lagu soo kordhiyey adeegyo cusub oo ah, in laga dhix isticmaali karo Web Browser-ka iyo in Business ama ganacsi ahaan loo adeegsan karo.



Faa'iidooyinka WhatsApp-ka waxaa ka mid ah:

- In si lacag la'aan ah la isugu diri karo dhambaallo ama fariimo.
- In laga dhix samaysan karo bar-kulanno gaar u ah dadka intii dan isku mid ah leh, si ay barkulankaasi ugu wada xidhiidhaan, iyadoo aan cid kale arki karin is-wareysigooda (Group Chatting).
- Is-barasho: WhatsApp-ku waxa uu fududeeyaa isla marka na uu isu soo dhaweeyaa, dad badan oo aan hore aqoon iyo aragti isu lahayn, balse dantooda guud ay midaysay, sida; dad badan oo ka mid ah Ururka Laasdhure.
- WhatsApp-ka waxa laga samayn karaa, in si toos ah aad qofka u wacdo, oo aad halkaasi iska maqashaan, waana wax wayn marka laga eegayo dhanka xidhiidhka bulshada.
- WhatsApp-ku waxa uu yareeyay wakhtigii badnaa ee ku lumayay la-hadalka dad badan, waxaad hal macluumaad ama hal xog siin kartaa koox aad dan-wadaag tiihin.



4. WHATSAPP GROUP-KA URURKA LAASDHUURE

- Guud ahaan sidaynu la wada soconno, bartani waa mid ina wada kulmisa, aragtiyaha iyo xogaha kala duwanna aynu isku dhaafsanno, waana bar ay ku midaysan yihiin xubnaha ururka Laas-dhuure ee kala jooga dalka iyo dibbada.
- Waa bar aynu u adeegsanayno danaha ururka Laas-dhuure ee leh:
 - Waxbarasho
 - Isku xidhka bulshadeena
 - Kobcinta kartida iyo awoodeenna bulsho
 - Is-dhaafsiya aragtiyaha kala duwan
- Sida uu qabo xeerka ururku, qof kasta oo ka mida ururku waa mid u xor ah fikradiisa iyo aragtida uu qabo, waa na in xubnaha kale ee ururku ay ku tixgaliyaan.



4.1 Hab-Maamulka WhatsApp Group-keena

Sida aynu la wada socono; waxa halkan inagu mideeyay waa aragti himilo iyo hiigsi fog leh, oo ku salaysan wax u qabashada bulshadeena, gaar ahaan in aynu horumarinno waxbarashada dadkeena aan awoodin, iyo in aynu fursadaha jira ku baraarujinno oo wacyigalinno inta awooda.

Si aynu hadafkaa u xaqijinno, waa mid u baahan illaalinta hillinka loo marayo, taasi oo ka bilaabmaysa bartan aynu wadda joogno, inaga oo hadana kala durugsan.

- Group-keena waxa ka reeban in wax ka baxsan danaha ururka lagu wadaago, oo lagaga wadda hadlo.
- Group-keena waxa ka reeban in muuqaallo, codad iyo sawiro aan ururka iyo danihiisa khusayn la soo dhigo.
- Group-keena waxa ka reeban shakhs-i-weerarka, marka aynu doodaha iyo barnaamijyada ku jirno, qofku waa in uu xooga saaro mawduuca iyo qodobka laga hadlayo.
- Group-keena waxa ka reeban, wax kasta oo ka soo hor jeeda xeerka iyo wada-jirka ururka Laasdhure.

Maamulka group-keena WhatsApp waxay fasax u haystaan, in ay ka masaxaan group-ka qoraallada, codadka, sawirrada iyo muuqaallad khilaafsan xeerkeenna.



Whatsapp Group

4.2 Barnaamijyada Diyaarka Ah

Geedi-Socod: Waa barnaamij u gaar ah guddida fulinta, oo ay kaga hadli doonaan qorshayaasha iyo hawlahooda maalinlaha ah, iyo wixii u qabsoomay, wuxuu soo geli doona Jimcihi 9:00 fiidnimo bariga Africa.



Dabar: Barashada shuruucda ururka, waa barnaamij aynu kaga waramayno shuruucda iyo xeerarka ururka Laasdhure, waana barnaamij guddida anshaxa iyo dabagalka u gaara, Dabar waa mid qodob-qodob isku dul taagaya muhiimada shuruucda ururka, isla markaana muhiimada uu qodobka kastaa ku fadhiyo lagu falanqayn doono, xubnaha ururka ee qodob xeerkka ka mida su'aal ama mad-madaw kaga jiro, waa mid siinaya fursad ay ku helaan sharaxaad dheeraad ah, waxa uu hawada soo galayaa Axadda 9:00 cawaysnimo bariga Africa.

Wacyigelin: Waa barnaamij u gaar ah ollalaha diiwaangelinta iyo arrimaha waxbarashada ee ururka, waxa lagaga hadli doona halka iyo heerka ay arrimahaasi marayaan, wuxuu noqon doona wareysi iyo warbixinno ku saabsan waayaha ardeyda ururka u diiwaangashan ama ollolaha diiwaangelintu halka uu marayo, waxa uu soo galayaa bishii ba mar 9:00 fiidnimo bariga Africa.

4.3 Barnaamijyada Soo Socda (Coming Soon)

Raad: Baro deegaannada dadkeenu degaan, waa barnaamij diiradda saaraya deegaannada kala duwan ee aynu leenahay, iyada oo laga eegayo goobta uu dhaco muhiimadeeda, khayraadka uu leeyahay ha noqdo mid la manaafacaadsado hadda ama mid aan weli la soo saarin, iyo waxyaabahaha uu gaarka la yahay deegaankaasi, waxa lagu soo casuumi doonaa, xubno dadka iyo deegaanka aqoon durugsan u leh, wuxuu soo galayaa habeenka Arbacada 9:00 fiidnimo bariga Africa.

Hillin: Baro Haldoorkaaga; waa barnaamij ku salaysan horumarinta bulshada, iyada oo dhalinyarada kala duwan ee ururka Laasdhure, ee horumarka iyo guulaha kala duwan sameeyay lagu marti qaadayo, si ay uga waramaan hillinkii ay u mareen hayaanka guusha, barnaamijkani wuxu diirada saaraya dhalinyarada horumarka ka samaysay dhinacyada aqoonta, ganacsiga, iwm... si ay dhiirigalin ugu noqoto xubnaha kale ee ururka, waa barnaamij ay su'aallo ku waydiin karaan xubnaha ururku xubinta cawayska ku casuuman, wuxuu soo galayaa Khamiista 9:00 fiidnino bariga Africa.

Hiigso: Waa barnaamij u furan guud ahaan xubnaha ururka Laasdhure, sida ku cad xeerka qof kasta wuu ka qayb qaadan karaa hawl kasta oo socota, is dhaafsiga aragtiyaha kala duwan iyo isku ixtiraamkuna waa mid ka mida qodobada uu ku dhisan yahay ururkeenu, hadaba iyadoo taas laga duulayo, qofka haya fikrad ka dhex guuxaysa, oo raba in uu dadka la wadaago, waa inuu maalin kahor u soo gudbiyo xoghayaha guud ee ururka.

FIIRO-GAARA: Barnaamijkani waxaa ka reeban aragtiyaha xambarsan siyaasad, cunfi iyo wixii abuuraya kala-qaybsanaan.

5. WEBSITE-KA URURKA LAASDHUURE

The screenshot shows the homepage of the Ururka Laasdhure website. At the top, there is a large group photo of many people standing outdoors. Below the photo, the title "URURKA LAASDHUURE" and subtitle "Horumarinta Waxbarashada" are displayed, along with the logo of the Universal Leadership Foundation.

Header navigation includes: July 29, 2024 11:04:40 PM, Daawo Shirweynihii 1aad, ARDAA, SAWIRO, BARO URURKA, a lock icon, and a search bar.

Main menu categories: XUBNAHA URURKA, MASHAARIICDA URURKA, QAADHAANKA URURKA, and WARBIXINNO.

Content cards include:

- Dhudhubaha**: Gain knowledge about your country Somaliland and its hidden beautiful valleys. From West of Hargeisa...
- Kalmadda Guddoomiyaha**: A photo of a man wearing sunglasses and a red patterned shawl.
- Carro Yaambo**: A photo of a person working at a stall with yellow containers.
- Arabsiyo**: An aerial view of a town.
- Dhudhubaha**: A photo of a rocky landscape.

Account Numbers section:

- Telesom ZAAD #: 8494888
- Dahabshiil Account #: GEBD2821

Join WhatsApp Group button: Bar-Kulanka Xubnaha Online Ku Blir Oo Ka Qaybgal

Profile sections for Guddida Fulinta and Guddida Anshaxa & La-Xisaabtanka, each with a photo, contact information (WhatsApp No. and Email), and a WhatsApp group link.

Bottom footer: Guddida Anshaxa.

Ciwaanka website-ka lagu galaya waa <https://laasdhure.org/>

5.1 Faahfaahinta Website-ka

WWW.LAASDHUURE.ORG

Website-ka laasdhure waxa uu ka kooban yahay qaybo badan, waxa ka mid ah:

- Qaybta Wararka
- Qaybta Database-ka
- Qaybta Sawirrada iyo Muuqaallada
- Qayb laga baranayo ururka iyo xeerkiiisa
- Qayb lagala xidhiidhi karo madaxda guddiyada ururka, sida; guddoomiyeyaasha guddida fulinta, anshaxa iyo laxisaabtanka, iyo xoghaynta guddida anshaxa oo qofkii sixid, cabasho ama tabasho hayaa uu toos ugala xidhiidhi karo, fariin WhatsApp ahna uu u diri karo.
- Dhawaan waxaynu ku soo kordhin doonaa qaybo badan oo muhiim u ah hawla ha ururka insha'a Allaah.

Website-ka ururka laasdhure maaha mid cid walba u furan, marka qofku soo booqda ciwaanka website-ka, ma heli karo macluumaadkii website-ka ku jiray oo dhan, waxa uu u baahan yahay inuu haysto ogolaansho (Username iyo Password).

Marka aad website-ka booqato, taabo barta uu qufulku ku sawiran yahay, ee goobaabinta cas ku wareegsan tahay.

Kadibna waxa kuu soo bixi doona halkii aad ku qori lahayd **Username** iyo **Password** ka lagu galayo website-ka, marka aad qorto taabo **Login**

The screenshot shows a login interface. At the top, the website title "ARDAA SAWIRO BARO URURKA" is displayed in a dark brown header bar, with a small padlock icon to its right. Below the header, there are two input fields: "User Name" and "Password", each with a corresponding text input box. Underneath these fields is a "Remember Me" checkbox. At the bottom of the form is a prominent orange "Login" button.

5.2 Qaybaha Website-ka

QAYBTA WARARKA: qaybtan waxaad ka helaysaa dhacdooyinka, barnaamijyada iyo wararka muhiimka ah ee ururka, waxaanay ku jirtaa homepage-ka ama ardaaga.



QAYBTA SAWIRRADA: qaybtan waxa ku jira dhamaan sawirrada ka turjumaya dhacdooyinka iyo hawlaha ururku gudagalo, waxay sida oo kale keyd iyo xusuus-reeb u tahay ururka.

QAYBTA DATABASE-KA: qaybtani waa ta ugu muhiimsan isla markaana ay ku jiraan dhamaan foomamka ururku ku fulinayo hawlihiisa shaqo, waxa ka mid ah foomamkaasi:

- Foomka diiwaangelinta xubnaha
- Foomka diiwaangelinta ardeyda
- Foomka diiwaangelinta qaadhaannada la soo bixiyay

Waxa kale oo qaybtan ku jira Reports-kii ama warbixinihii ururku ku hawlgalayay, oo uu website-keenu u diyaarinayo qaabab kala duwan, oo ka turjumaya kolba baahida ururku qabo iyo sida uu wax u rabo, warbixinahaasi waxa ka mid ah:

- Warbixinta xubnaha oo u dhigan qaabab kala duwan
- Warbixinta ardeyda oo u dhigan qaabab kala duwan
- Warbixinta qaadhaannada la soo bixiyay oo u habeysan dhowr qaab oo kala duwan

6. GUNAANAD

Guntii iyo gabagabadii; samaynta xeerarku waa mid ka timaada umadda in gaar ah, balse waa mid wada saamaysa guud ahaan kuwii sameeyay iyo kuwa kaleba, hawsha ugu adagi se waa illaalinta iyo xaqdshawrka shuruucda, xeerarka iyo nidaamyada inoo yaalla, kanina waa mid ka mida uun, markaa waa mid ina wada saaran xeerarkaasi dhawriddoodu iyo daryeelka shuruucdaa inoo yaallaa.

Alloow aqoon, waayo aragnimo iyo wixii aan seeg-seegnay ha noo qaban, waa sunaha nolosha ee qori-isku-dhiibka ah, nidaamkani waa mid wakhtiga loo baahdo wax-ka-badal iyo kaabis ba lagu samayn karo.

Ururka Laasdhure waxaanu guud ahaan u rajaynaynaa guul iyo horumar buuxa.

